Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa



# Boqoraddii Quruxda Badnayd ee Esteer

Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Janie Forest
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2023 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Waxaa jiray gabadh qurux badan oo la odhan jiray Esteer. Markii aabbaheedd iyo hooyadayba ay dhinteen, Esteer ina adeerkeed baa soo koriyey. Esteer aad by u xusheem jirtay ina adeerkeed Mordekay oo way addeeci jirtay sida gabadh wanaagsan.





Esteer axay ku noolaan
jirtay Faaris (Bershiya). Laaakiin, Esteer uma aysan dhalanin Faarisi, waxay ahayd Yuhuudad. Oo faraceedii baa yimid Faaris iyagoo maxaabiis dagaal ahaan ah. Waagii maalmihii Esteer, Yuhuud badan baa ku noolayd Faaris oo hadda loo yaqaano Iran.

Boqorkii Faaris ayaa u ameeyey diyaafad xaflad weyn ah Amiiadii dunida ka kala yimid.



Ragii waxbay ku cuneen meel ka fog meeshii dumarka oo ahayd barxaddii beertii boqorad Washti.



Boqrkii sarkhaansanaa ayaa amar ku bixiyey inay Boqorad Washti soo xirato taajkii boqornimada si quruxdeeda loo arko.  Boqorad Washti wey diiday inay timaaddo.

Dumarka in la tuso
awgeed inay xurmaayeen
ragga qaba, boqorkii
wuxuu soo saaray sharci
ka xayuubinaya taajka
boqortooyada Washti. Mana
sii ahaan doonto boqorad.



Baaritaan baana lagu sameeyey boqorad cusub in la helo. Dumarkii quruxd badnaa ee ku noolaa wadanka ay ka taliso boqortooyada oo idil, boqorkii wxuuu xushay Esteer inay noqoto xaaskiisa. Wuxuuna madaxeeda saaray taajka boqortooyada. Esteer ma aysan u sheegin inay tahay Yuhuudad sababta oo ah ina adeerkeed ayaa u sheegay inaysan sidaa odhan.





Ina adeer Morkeday inta badan wuxuu fariisan jiray albaabka weyn ee laga qasriga boqrtooyada si uu dhagadhageeyo wararka ku saabsan Esteer.

Maalin buu dusha ka dhagadhageeyey oo maqlay laba nin oo addoomada boqorka




ka mid ah oo qorshaynaya inay dilaan boqorka. Mordekay digniin buu diray lagu badbaadinayo nolosha boqorka. Shaqaalaihii addoonta ahaa waa la daldalay, oo magacii Mordekay waxaa lagu qoray buuggii boqortooyada.

Ninka ku xiga boqorka waxa uu nin taajir ah oo la odhan jiray Haamaan. Qof walbana way u foorarsan jirtay oo u sujuudi jirtay Haamaan markii meeshaa albaabak ah marayo. Cid walba - mid mooyee. Yuhuudda sidooda, Mordekay wxuuu caabudi jiray oo keliya Ilaah nool.




Haamaan wuu necbaa Mordekay si aad ah oo wuxuu go'aansaday inuu dilo isaga iyo Yuhuuddda degan wadanka Beershiya dhamaantood.  Sidee bay u xuntahay oo cabsi u leedahay!  Xumaanfalihii Haamaan wuxuu ku khiyaanay boqorkii saxiixa sharci wakhtiyada gaar ah meelmari karo oo Yuhuudi walba oo ku hoos nool boqortooyada la dili doono.






Waa sharci aad
u arxan daran.
Yuhuuddii iyo
Faarisiintiiba way
murugoodeen. Laakiin
xusuuso – Ilaah wuxuu
heystaa boqorad Esteer.
Oo Yuhuudiyad ah.
Miyey ka qarin kartaa
sirteeda boqorka?
Ama, khatar bay galin
kartaa nolosheeda si ay
dadkeeda u badbaadiso?


Ilaah Esteer fikrad fahma leh (Xariifnimo) buu siiyey. Waxay soo ku wada casuuntay barxadeeda boqorkii iyo Haamaan. Halkaa boqorkii wuxuu ballan ku galay inuu yeelayo wax walba oo ay weyddiisato. “Adiga iyo Haamaan kaalaya martiqaad aan idiin diyaarin doono berito,” Esteer ku jawaabtay. Dabadeed, iyadu way u sheegi doontaa boqorka waxa ay doonto.



Ilaa iyo wakhtigaas intii laga gaarayay, Haamaan wuxuu diyaarinyay tiirweyn oo lagu daldalo Mordekay.



Habeenkaa boqrkii wuu seexan kari waayay. Akhrintii buugga taariikhda wakhtigaas ayaa lagu arkay Mordekay inaan weligiiba laga abaalmarin badbaadadii nolosha boqorka uu badbaadiyey isaga.



Subaxdii xigtay boqrkii
Haamaan buu weyddiiyey,
"Ninka boqrku ku farxo inuu
maamuso maxaa loo yeelaa?"
Haamaan aad buu u farxay.
Isagoo moodaya inuu boqrku
isaga ula jeedo!



Haamaan wuxuu u yimid inuu weyddiisto boqorka fasax lagu daldalayo Modekay.
Tiirkii daldalaadana waa u diyaar.
Iminka taa baa la sugi karaabaa.
Si farxadaysan, waxaa ka soo baxay go'aankiisii. "Ninkaa dharka boqorka xargaha lahaa ha loo soo labiso iyo taajka."





"Ku fariisiya isaga faraska boqorka. Amarna sii Amiirada inay ninkaa la mariyo magaalada oo idil si loo wada arko." "Waxaasoo dhn aad sheegtay u samee Mordekay Yuhuudiga," Ayuu boqorkii ku amray Haamaan.


Sidee baad u malaynayaa inuu dareemayo Haamaan intuu isagu wado Mordekay oo maamuusan magaalada dhexdeeda?



Wuu sii nacay in ka badan nacaynkii hore ee uu u qabay. “Inyar iska sug,” Haamaan laga yaabee inuu ku fikirayay. “ Mar dhowba inuu la dhiman doono Yuhuudda kale oo idil.”



Maalintii maalintaa ka dambaysay, Haamaan iyo boqrkii waxay yimaadeen barxadii boqrodda Esteer. “Muxuu yahay codsigaaga?” boqrkii baa weyddiiyey. Mana uusan ilaabin ballantisii. Haamaan baa farta lagu fiiqay, Boqoraddii Esteer waxay u sheegtay waxwalba oo ku saabsanaa xumaantii sharka ee uu Haamaan qorsheeyey. “Daldala isaga!” ayuu boqorkii yidhi.



Dabadeed boqorkii wuxuu meel mariyey sharci kale oo u ogalaanayo Yuhuudda inay iyaga qudhooda isdifaacaan. Iyagu waa la badbaadiyey! Mordekay wuxuu noqday ninka labaad ee ku xiga boqorka oo wey wada farxeen Yuhuuddii oo dhan oo hadiyado ayay isu geeyeen midb midka kale. Xitaa maantadan, Dadka Yuhuudda ah way xusuustaan sidii Ilaah ugu soo badbadiyay gabadhan quruxda badan ee Esteer darteed.



# Boqoraddii Quruxda Badnayd ee Esteer

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Esteer

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

Dhammaad

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16